Takooridda da'da

La soco xuquuqdaada sharciyada Minnesota ee mamnuucaya takoorka da'da

Waa sharci darro haddii loo shaqeeyaha:

- diido inu shaqaaleeyo qof sabab ku saleysan da'da awgeed;
- yareeyo heerka ama boos darajo ama ruqseeyo qof sabab oo ku saleysan da'da awgeed;
- ka saarid ama xilka laga wareejiyo qofka sabab ku saleysan da'da, ama
- qasbo da'da hawlgabka haddii shaqaaleeyuhu haysto wax ka badan 20 shaqaale [29 United States Code §630 (b)].

Loo-shaqeeyayaashu hadii ay ka joojinayaan shaqaalaha da'dooda tahay 65 sano ama ka weyn shaqada sabab ah in ay kaso bixi karin shuruudaha shaqada waa inay bixiyaan 30 cisho oo ogeysiis ah in shaqada laga joojin doono.

Qoraalkan waxa ku jira oo kaliya dulmar ah sharciga Minnesota.
Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha Minnesota
Telefoonka: 651-284-5075

Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota
Telefoonka: 651-539-1100

WAAXDA SHAQAALAHA IYO WARSHADAHA

651-284-5070 • 800-342-5354 • dli.laborstandards@state.mn.us • www.dli.mn.gov

Sharciga ayaa qaba in lagu dhajiyo ogaysiskan meel shaqaalaha si fudud u arki karan. Sebtembar 2017

Shirarka uu maalgaliyo shaqo-bixiyaha

Shirarka uu maalgaliyo shaqo-bixiyaha ama Ogeysiiska Sharciga Isgaarsiinta

Shaqo-bixiyaha ama wakiilkiisa, metelaha, ama qofka loo xil-saaray waa in uusan hanjabin, shaqada ka eryin, ciqaabin, ama uu ku soo rogin cunaqabatayn, ama tallaabo kale oo waxyeello leh ku qaadin shaqaalaha

1. Sababtoo ah shaqaalaha oo diida in uu ka soo qayb galo ama ka qayb qaato shir uu maalgaliyo loo shaqeeyaha ama uu diido inuu aqbalo ama dhaqeyto isgaarsiinta loo shaqeeyaha ama wakiilka matala, ama qofka loo xilsaarey. Hadii shirka ama isgaarsiintu ay tahay in lagu gudbiyo aragtida loo shaqeeyaha oo ku saabsa diin ama siyaasad.
2. Si loogu qancinayo shaqaalaha inuu ka soo qayb galo ama ka qayb qaato shirarka ama uu helo ama dhageysto isgaarsiinta lagu sharaxay (1) kor ku xusan; ama
3. sababtoo ah shaqaaluhu, ama qof ku hadlaya magaca shaqaalaha, wuxuu sameeyaa warbixin qoraal ama afka ah oo daacad ah oo ku saabsan xadgudub ama xadgudub la tuhunsan yahay oo ku saabsan Shuruucda Isgaarsiinta ama Shirarka uu Maalgaliyo Shaqobixiyaha.

Xaalmarino

Shaqsi shaqaale oo la dhibaateeyey wuxuu qaadi karaa tallaabo sharciga ah si uu u dhaqan geliyo sharciga kulammada ama isgaarsiinta lagu taageerayo bulshooyinka ugu dambeyn 90 maalmood kadib taariikhda la sheegay ee ihada khaladka. Maxkamaddu waxay bixisaa dhammaan magdhow ku habboon, oo ay ku jiraan magdhow joojinta, dib-u-soo-celinta, lacag celinta, iyo dib-u-soo-celinta wax kasta oo faa'iido ah oo bulshooyinka, kharashaadka qareennada iyo kharashaadka kale.

Baaxadda

Shirarka uu maalgaliyo shaqo-bixiyaha ama Ogeysiiska Sharciga Isgaarsiinta ma ahan.

1. mamnuucid isgaarsiinta macluumaadka ee shaqa bixiya shariga oka baahan yahay in uu kula xiriiro, laakiin kaliya ilaa heerka sharciga ah ee loo baahan yahay.
2. xadidid xuquuqda loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, ama wakiilkiisa si uu u qabto shirarka ku lug leh arrimaha diinta ama siyaasadda ilaa inta ka-qaybgalku uu yahay mid ikhtiyaari ah ama ku lug leh isgaarsiinta ilaa inta helitaanka ama dhageysiga ay tahay gebi ahaanba ikhtiyaari ah; ama
3. xadidid xuquuqda loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, ama wakiilkiisa inuu la xiriiro shaqaalihiisa macluumaad kasta, ama u baahan ka qaybgalka shaqaalaha shirarka iyo dhacdooyinka kale, taas oo lagama maarmaan u ah shaqaaluhu si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo ee sharciga ah.

Marka la soo koobo, sharcigani ma mamnuucayo ama ma xakameynayo hadalka loo shaqeeyaha. Sharcigu wuxuu nidaamiyaa marka loo-shaqeeyuhu uu edbin karo ama eryayo shaqaale diidaya inuu ka qayb galo shirarka ku saabsan arrimaha diinta ama siyaasadda.

Si aad dib ugu eegto sharcigan si buuxda, oo ay ku jiraan qeexitaanno, shuruudaha ogaysiinta iyo macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan dawooyinka, eeg Minn. Stat. § 181.531. Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ma dhaqangeliso sharcigan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharcigaan, la xiriir qareenkaaga.

October 2024

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

651-284-5075 • 800-342-5354 • dli.laborstandards@state.mn.us • dli.mn.gov

Notice: This is a brief summary of Minnesota law. It is intended as a guide and is not to be considered a substitute for related Minnesota Statutes.

Mushaharka Ugu Yar iyo Shuruudo Kale

2026 Mushaharka ugu yar – Wuxuu khuseeyaa dhammaan shaqo-bixiyeyaasha Minnesota.	**$11.41**/Saacaddii
2026 Mushaarka Tababarka – Waxaa loo oggol yahay in mushaharka tababarka la siiyo shaqaalaha ka yar 20- sano muddada sagaashanka maalmood ee xiriirka ah ee bilowga shaqadooda.	**$9.31**/Saacaddii

dli.mn.gov/minwage

SAACADAHA DHEERAADKA AH

Saacadaha dheeriga ah waa lacag-bixin waajib ah oo u dhiganta hal-iyo-bar (1.5) qiimaha saacadda ee caadiga ah ee uu shaqaaluhu qaato.

Shaqo-bixiyeyaasha iyo shaqaalaha ay daboolaan oo keliya gobolka	Shaqo-bixiyeyaasha iyo shaqaalaha ay daboolaan heer federaal
Kadib **48** saacadood toddobaadka shaqada gudaheed	Kadib **40** saacadood toddobaadka shaqada gudaheed

XATOOYADA MUSHAARKA

Xatooyada mushaharka waxay dhacdaa marka loo-shaqeeye uusan bixin mushaharka ay shaqaaluhu kasbadeen, oo ay ku jiraan mushaharka ugu yar, lacagta saacadaha dheeraadka ah, ama heerarka kale ee mushaharka ee sharcigu waajib ka dhigayo.

dli.mn.gov/wagetheft

WAKHTIGA JIRRADA IYO BADBAADADA

Wakhtiga jirrada iyo badbaadadu waa fasax lacag leh oo ay shaqo-bixiyeyaashu waajib ku tahay inay siiyaan shaqaalaha Minnesota, kaas oo loo isticmaali karo sababo gaar ah, oo ay ku jiraan marka shaqaaluhu xanuunsan yahay, daryeelka xubin qoys oo xanuunsan, ama raadinta caawimaad haddii shaqaaluhu ama xubin qoyska ka mid ahi la kulmo rabshad guri, faraxumayn galmo ama daba-gal.

sickleave.mn.gov

NASASHO IYO NASASHADA CUNTADA

Shaqo-bixiyeyaashu waa inay oggolaadaan ugu yaraan 15 daqiiqo oo nasasho ah afartii saacadood ee shaqo ee isku xiga, iyo ugu yaraan 30 daqiiqo oo nasashada cuntada ah haddii shaqadu socoto lix saacadood ama ka badan oo isku xiga.

dli.mn.gov/breaks

AAR-GUDASHO WAA LA MAMNUUCAY

Shaqo-bixiye ma eryi karo, ma ciqaabi karo, ma ganaaxi karo, ma faragelin karo, ma hanjabi karo, ma xannibi karo, ma qasbi karo, ama si kale ugama aargoosan karo ama uguma takoori karo shaqaale ku saabsan isticmaalka xuquuqdooda sharciga hoos yimaada, oo ay ku jirto soo sheegista xadgudub ama ka qaybqaadashada baaritaan.

dli.mn.gov/retaliation

SOO SHEEG XADGUDUBYADA

Si aad u soo sheegto xadgudubyadan iyo sharciyada kale ee shaqada, la xiriir Qaybta Heerarka Shaqada:dli.laborstandards@state.mn.us ama 651-284-5075.

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

Ogeysiiska mushaharka ugu yar waa in sharci ahaan lagu dhejiyaa meel ay shaqaaluhu si fudud u arki karaan.

Maarso 2026

Mushaharka Ugu Yar iyo Shuruudo Kale

2027 Mushaharka ugu yar – Wuxuu khuseeyaa dhammaan shaqo-bixiyeyaasha Minnesota.	**$11.87**/Saacaddii
2027 Mushaarka Tababarka – Waxaa loo oggol yahay in mushaharka tababarka la siiyo shaqaalaha ka yar 20- sano muddada sagaashanka maalmood ee xiriirka ah ee bilowga shaqadooda.	**$9.68**/Saacaddii

dli.mn.gov/minwage

SAACADAHA DHEERAADKA AH

Saacadaha dheeriga ah waa lacag-bixin waajib ah oo u dhiganta hal-iyo-bar (1.5) qiimaha saacadda ee caadiga ah ee uu shaqaaluhu qaato.

Shaqo-bixiyeyaasha iyo shaqaalaha ay daboolaan oo keliya gobolka	Shaqo-bixiyeyaasha iyo shaqaalaha ay daboolaan heer federaal
Kadib **48** saacadood toddobaadka shaqada gudaheed	Kadib **40** saacadood toddobaadka shaqada gudaheed

XATOOYADA MUSHAARKA

Xatooyada mushaharka waxay dhacdaa marka loo-shaqeeye uusan bixin mushaharka ay shaqaaluhu kasbadeen, oo ay ku jiraan mushaharka ugu yar, lacagta saacadaha dheeraadka ah, ama heerarka kale ee mushaharka ee sharcigu waajib ka dhigayo.

dli.mn.gov/wagetheft

WAKHTIGA JIRRADA IYO BADBAADADA

Wakhtiga jirrada iyo badbaadadu waa fasax lacag leh oo ay shaqo-bixiyeyaashu waajib ku tahay inay siiyaan shaqaalaha Minnesota, kaas oo loo isticmaali karo sababo gaar ah, oo ay ku jiraan marka shaqaaluhu xanuunsan yahay, daryeelka xubin qoys oo xanuunsan, ama raadinta caawimaad haddii shaqaaluhu ama xubin qoyska ka mid ahi la kulmo rabshad guri, faraxumayn galmo ama daba-gal. Waqtiga Jirrada iyo badbaadadu waa ka duwan yahay Fasaxa Lacag-bixinta ee Minnesota (Paid Leave Program).

sickleave.mn.gov

NASASHO IYO NASASHADA CUNTADA

Shaqo-bixiyeyaashu waa inay oggolaadaan ugu yaraan 15 daqiiqo oo nasasho ah afartii saacadood ee shaqo ee isku xiga, iyo ugu yaraan 30 daqiiqo oo nasashada cuntada ah haddii shaqadu socoto lix saacadood ama ka badan oo isku xiga.

dli.mn.gov/breaks

AAR-GUDASHO WAA LA MAMNUUCAY

Shaqo-bixiye ma eryi karo, ma ciqaabi karo, ma ganaaxi karo, ma faragelin karo, ma hanjabi karo, ma xannibi karo, ma qasbi karo, ama si kale ugama aargoosan karo ama uguma takoori karo shaqaale ku saabsan isticmaalka xuquuqdooda sharciga hoos yimaada, oo ay ku jirto soo sheegista xadgudub ama ka qaybqaadashada baaritaan.

dli.mn.gov/retaliation

SOO SHEEG XADGUDUBYADA

Si aad u soo sheegto xadgudubyadan iyo sharciyada kale ee shaqada, la xiriir Qaybta Heerarka Shaqada:dli.laborstandards@state.mn.us ama 651-284-5075.

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

Ogeysiiska mushaharka ugu yar waa in sharci ahaan lagu dhejiyaa meel ay shaqaaluhu si fudud u arki karaan.

Oktoobar 2026

FASAXA MUSHARKA LEH EE MINNESOTA

Laga bilaabo Janaayo 1, 2026

Fasaxa Musharka leh ee Minnesota wuxuu bixiyaa lacag iyo ilaalinta shaqada marka aad u baahato inaad qaadato waqti fasax ah si aad isugu daryeesho naftaada ama qoyskaaga.

Maxaan oogu isticmaali karaa Fasaxa Musharka leh?

Fasaxa Caafimaadka:

- Si aad isugu daryeesho xaalad caafimaad oo halis ah oo kuu gaar ah, oo ay ku jirto daryeel la xiriira uur, dhalmo, iyo soo kabasho

Fasaxa Qoyska:

- **Fasaxa Is-xirnaanta** – si loo daryeelo loona xirmo ilmo cusub oo lagu soo dhoweeyay qoyska iyadoo loo marayo dhalasho, korsasho, ama meeleyn la xannaaneynayo
- **Fasaxa Daryeelka** – si loo daryeelo xubin qoyska ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo halis ah
- **Fasaxa Qoyska Milatari** – si loo taageero xubin qoyska ka tirsan oo loo yeeray inuu galo adeeg firfircoon
- **Fasaxa Badbaadada** – si looga jawaabo arrimo la xiriira tacaddiga guriyeed, kufsiga, ama daba-galka adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan

Guud ahaan, xaaladuhu waa inay socdaan in ka badan toddoba maalmood, waxaana ay u baahan yihiin in la caddeeyo iyadoo la marayo bixiyaha daryeelka caafimaadka ama xirfadle kale.

Ma u qalmaa Fasaxa Musharka leh?

Shaqaalaha intooda badan ee Minnesota waxay u qalmaan Fasaxa Musharka leh. Waxaad u qalantaa Fasaxa Musharka leh, iyadoon loo eegin inta uu weyn yahay shaqo-bixiyahaaga, ama tirada saacadaha ama maalmaha aad shaqeyso.

Qandaraaslayaasha madax-bannaan iyo dadka iskii isu shaqeysta si toos ah looguma daro barnaamijka, balse way iska dooran karaan inay ka qeybqaataan. Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto lacag-bixinta haddii aad sanadkii tegay ka shaqeysay Minnesota oo aad heshay ugu yaraan $3,900 (tusaale ahaan, si loogu qalmo Fasaxa Musharka leh sanadka 2026).

Intee ayan fasax qadan karaa?

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto illaa 12 isbuuc oo fasax qoys ama caafimaad ah sannadkii faa'iidada. Haddii aad u baahato fasax qoys iyo caafimaad labadaba isla sannadka faa'iidada, waxaad u qalmi kartaa illaa 20 isbuuc guud ahaan.

Imisa lacag ah ayaan heli doonaa?

Marka aad isticmaasho Fasaxa Musharka leh, dowladda gobolka ayaa ku siin doonta lacagta. Fasaxa Musharka leh wuxuu dabooli karaa ilaa 90% mushaharkaaga, iyadoo lagu saleynayo heerka dakhligaaga, iyadoo sidoo kalena lagu xadidayo qaddarka ugu badan ee toddobaadlaha ah ee celceliska mushaharka gobolka. Qaddarkaasi wuu isbedelaa sannad kasta, wuxuuna noqonayaa $1,423 marka la bilaabayo Fasaxa Musharka leh ee 2026.

Yaa bixiyaa kharashka Fasaxa Musharka leh?

Fasaxa Musharka leh waxaa lagu maalgeliyaa lacagta caymiska (premium) ee ay bixiyaan shaqaalaha iyo shaqo-bixiyeyaasha. Heerka bilowga ah ee lacagta caymiska waa 0.88% mushaharka la caymiyay. Shaqo-bixiyahaagu wuxuu ka jari karaa ilaa 0.44% mushaharkaaga si uu u daboolo qaybtaada ka mid ah lacagta caymiska.

Maxay yihiin ilaalinta shaqada ee aan leeyahay?

- **Ilaalinta shaqada**: Guud ahaan, waa in lagugu soo celiyo shaqadaadii ama boos u dhigma marka aad fasaxa ka soo laabato. Ilaalinta shaqada waxay dhaqangalaysaa 90 maalmood ka dib taariikhda laguu shaqaaleysiiyay.
- **Sii wadidda caymiska caafimaadka**: Guud ahaan, shaqo-bixiyeyaashu waa in ay sii wadaan bixinta qaybtooda caymiska caafimaadka inta aad fasaxa ku jirto.
- **Ma jiri karo aargudasho ama faragelin:** Shaqo-bixiyeyaashu waa inaysan kaa hor istaagin ama kugu aargudan haddii aad codsato ama isticmaasho Fasaxa Musharka leh. Shaqo-bixiyuhu ma qaadan karo lacagaha Fasaxaaga Musharka leh.

Wixii su'aalo ah ee la xiriira Fasaxa Musharka leh, fadlan la xiriir Minnesota Paid Leave adigoo wacaya 651-556-7777 ama booqo mareegteena.

Haddii aad u maleyneyso in shaqo-bixiyahaagu uu jebinayo xuquuqdaada shaqo, la xiriir Waaxda Heerarka Shaqada ee Wasaaradda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota.

WAXBADAN KA OGOW: paidleave.mn.gov

Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay dadka naafada ah ama dadka u baahan kaalmo luqadeed, adigoo wacaya Xarunta Xiriirka ee Fasaxa Musharka leh: 651-556-7777 ama 844-556-0444 (wacitaan bilaash ah).

MINNESOTA PAID LEAVE

Minnesota Paid Leave | 180 E 5th St Suite 1200 | Saint Paul, MN 55101

7/2025

Ilaalinta amaanka iyo caafimaadka shaqada

Shaqaalaha

Sharciga Shaqaaleedka Ammaanka iyo Caafimaadka Minnesota (Minnesota Occupational Safety and Health Act) wuxuu shardi ka dhigayaa in aad shaqaalahaaga u diyaarisid goob shaqo oo ka badqabta halisyada la yaqaan oo sababi kara dhimasho, dhaawac ama jirro. Sidoo kale waa in aad raacdaa xuquuqda iyo masuuliyadaha goobta shaqada.

- Waa in aad raacdaa heerarka iyo nidaamyada badbadada idil shaqaalaha ee Minneota OSHA (MNOSHA).
- Loo shaqeeyahaaga waa in uu ku siiyo macluumaad kasta oo ku saabsan halisyada kiimikada, halisyada cawaamilka muuqata iyo cawaamilka caabuuqyada goobta shaqada ka dhalan kara.
- Xaq waxaad u leedahay in aad kala hadashid loo-shaqeeyahaaga ama MNOSHA walaacyada ku saabsan ammaanka iyo caafimmadka goobta shaqada.
- Xaq waxaad u leedahay in aad diiddo qabashada shaqada haddii aad rumaysantahay in xilka ama qalabka uu kuu keeni karo halis deg-degga ama dhimasho ama dhaawac jirka. Si kastaba, waa in aad qabataa xil kasta oo loo-shqeeyahaagu kuu xilsaaro. Goobta shaqada si fudud ugama tagi kartid.
- Xaq waxaad u leedahay in lagu soo wargaliyo ama lagu faahfaahiyo haddii loo-shqeeyahaagu dalbado in wax laga baddelo heerarka shuruudaha MNOSHA.
- Xaq waxaad u leedahay in aad la hadashid baaraha MNOSHA ee goobtaada shaqada baaraya.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka xarayso cabasho MNOSHA ku saabsan ammanka, caafimaadka halisyada iyo codsato in baaris la sameeyo. MNOSHA uma kashifayso magacaada loo-shaqeeyaha.
- Xaq waxaad u leedahay in lagu tuso xogta dacwdaha idil, ciqaabaha iyo khafiifinta canshuuraha MNOSHA ay ka samaysay loo-shaqeeyahaaga.
- Loo-shaqeeyahaagu kuguma takoori karo isticmaalka xuquuqdaada Sharciga awgeed. Si kastaba, loo shaqeeyahaaga waxuu kugu anshax-marin karaa sababa la xariira in aadan raacin nidaamyada ammaanka iyo caafimaadka. Haddii aad rumaysantahay in loo-shaqeeyahaagu ku takooray sababa la xariira isticmaalka xuquuqdaada Sharciga, waxaa aad haysataa 30 maalmood in aad uga soo dacwooto MNOSHA.
- Loo-shaqeeyahaagu waa in uu bixiyaa kashifaad kasta iyo xog kasta oo caafimaad ee adiga lagaa hayo marka la weydiisto.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka qaybgasho horumarinta heerarka MNOSHA.

Loo-shaqeeyeyaalka

Waa in ad u diyaarisaa shaqaalahaaga jawi ammana oo caafimaad qaba xorna ka ah halis la garan karo oo sababi karta dhimasho, dhaawac ama jirro iyo u hoggaansanaatid heerarka MNOSHA ee la dabbaqi karo oo idil. Waxaa kale leedahay xuquuqda iyo masuuliyadaha soo socda.

- **Waa in aad ku dhajisaa nuqul ka mida sawirkan wayn** iyo dokumentiyada kale ee MNOSHA meeelaha lagu dhajiyo ogaysiisyada shaqaalaha.
- **Waa in aad soo wargelisaa MNOSHA siddeed sacadood** gudahood shilalka idil ee sababa dhimasho shaqalaha.
- **Waa in aad soo wargalisaa MNOSHA 24 saac gudahood** shilalka idil ee sababa addin go', indha-beel ama isbitaal seexin ee shaqaale kasta ku yimaada.
- Waa in aad u oggolaataa baarayaasha MNOSHA in ay sameeyaan baarisyada, waraysiyada shaqaalaha iyo dib-u-eegidda xogta.
- Waa in aad diyaarisaa qalabka idil ee ilaalinta shaqaalaha iyo tababarrada oo aad adigu kharashkooda qabto.
- Xaq waxaad u leedahay in aad ka qaybqaadato horumarinta heerarka MNOSHA.

Kaalmada ammaanka iyo cafimaadka lacag-la'aanta

Kaalma lacag-la'aana oo la sugayo iyo halisyada saxda ah ayaa shaqaalaha u diyaara, iyado aan dacwao lahayn iyo ciqaab toona, oo loo sii marayo MNOSHA Workplace Safety Consultation telefoonka (651) 284-5060, 1-800-657-3776 ama osha.consultation@state.mn.us.

La xariir MNOSHA wixii ku saabsan nuqul Sharciga, ee si gaara u quseeya ammaanka iyo caafimaadka heerarka xaraynta dacwo la xariirta halisyada goobta shaqada.

Loo-shaqeyeyaasha, shaqaalaha iyo xubnaha ka mida dadweynaha ee doonaya in ay dacwo xareeyaan la xariirta Barnaamijyada MNOSHA waxay u qori karaan waraaq federaaka OSHA Gobolka Xaafiiska 5: U.S. Department of Labor, Occupational Safety and Health Administration, Chicago Regional Office, 230 S. Dearborn Street, Room 3244, Chicago, IL 60604.

OSHA
DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

(651) 284-5050 • 1-877-470-6742 • osha.compliance@state.mn.us • www.dli.mn.gov

Sharciga ayaa qaba in lagu dhajiyo meel shaqaalaha si fudud u arki karan.

Agoosto 2017

SHAQO LA’AAN?

Ma shaqo la’aan baad tahay mise saacadaha shaqada ayaa lagaa dhimay?

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato lacagta Caymiska Shaqo Caymiska la’aanta.

Ka codso khadka internet-ka:

www.uimn.org

ama teleefoonka:

651-296-3644 (Magaalooyinka Mataanaha)

Khadka bilaashka ah **1-877-898-9090** (Meelaha kale ee MN)

Teletypewriter (TTY) 1-866-814-1252

Maclumaadkan waxaa lagu heli karaa siyaabo kale (oo loo akhrisan karo) adiga oo wacaya 651-259-7223.

DEED is an Equal Opportunity Employer/Provider

DEED-50227 SOMAI / MARCH 2022

Magdhawga Shaqaalaha

Haddii aad dhaawacanto

- U sheeg wixii dhaawac ah kormeerahaaga sida ugu dhakhsaha badan, adiga oo aan u eegayn inaad dhaawaca mid yar u aragto iiyo in kale. Waxaa laga yaabaa inaad lumiso xuquuqda magdhawga shaqaalaha haddii aanad warbixinta dhaawaca waqtigeeda ku siin loo shaqeeyahaaga. Xadka waqtiga waxay noqon kartaa sida ugu gaaban 14 maalmood.

  Dhaawacyada maanka ee la xiriira shaqada ayaa laga yaabaa inaad ugu qalanto dheefaha: haddii dhaawacyadaadu ay tahay xanuun walaac ah ka dib dhaawac oo leh ugu yaraan hal bil oo astaamo joogto ah oo uu xaqiijiyay dhakhtarka cilmi-nafsiga oo shati leh ama dhakhtarka maanka; ama haddii dhaawaca maanka uu la socdo dhaawac jireed.

- Sii loo shaqeeyahaaga macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah ee ku saabsan dhaawacaaga.

- U hel daaweyn kasta oo loo baahan yahay sida ugu dhakhsaha badan. Haddii aanad haysan caymiska hay'ad daryeel oo la xaqiijiyay (certified managed care organization, CMCO), waxaad daaweyn ka heli kartaa dhakhtar aad dooratay. Loo shaqeeyahaaga waa inuu qoraal ahaan kugu ogeysiiyaa haddii caymis lagugu siiyay CMCO.

- La shaqee dhammaan codsiyada macluumaadka ku saabsan sheegashadaada.

  Sharciga ayaa u oggolaanaya caymiyaha magdhawga shaqaalaha inuu helo macluumaad caafimaad oo la xiriira dhaawaca shaqada iyaga oo aan haysan oggolaanshahaaga, laakiin waa inay kuu soo diraan ogeysiis qoraal ah marka ay codsadaan macluumaadka.

  caymiyuhu ma heli karo diiwaanada kale ee caafimaadka illaa aad saxiixdo oggolaansho qoraal ah.

- Dhakhtarkaaga ka hel caddeyn qoraal ah oo cad oo oo ku saabsan oggolaansho kasta oo aad shaqada kaga maqnaanayso.

Magdhawga Shaqaalaha Waxay Bixisaa

- Daryeelka caafimaadka ee dhaawaca shaqada, illaa iyo inta ay macquul tahay oo ay lagama maarmaan tahay.

- Dheefaha luminta mushaharka ee qayb ka mid ah dakhligaaga lumay.

- Magdhawga dhaawaca joogtada ah ama luminta xubin jirka ka mid ah.

- Adeegyada baxnaaninta xirfadaha haddii aanad ku soo laaban karin shaqadaada dhaawaca ka hor ama loo shaqeeyahaaga dhaawaca ka hor sababo la xiriira dhaawaca shaqada.

- Dheefaha lamaanahaaga iyo/ama kuwa kugu tiirsan haddii aad u dhimato dhaawaca shaqada.

Waxa ay tahay in caymiyuhu sameeyo

- Caymiyuhu waa inuu si degdeg ah u baaro sheegashadaada. Haddii aad naafo tahay in ka badan saddex maalmood oo kalendar ah, caymiyuhu waa inuu bilaabaa bixinta dheefaha ama uu kuugu soo diraa diidmada mas'uuliyadda 14 maalmood gudahood ka dib marka loo shaqeeyahaagu ogaado inaad shaqada ka maqnayd ama aad lumisay mushaharka dhaawaca aad sheegtay darteed.

- Haddii caymiyuhu aqbalo sheegashadaada dheefaha luminta mushaharka oo aad naafo ahayd in ka badan saddex maalmood oo kalendar: Caymiyuhu wuu ku soo ogeysiin doonaa oo waa inuu bilaabaa bixinta dheefaha luminta mushaharka 14-ka maalmood gudahood ee kor lagu xusay. Caymiyuhu waa inuu dheefaha ku bixiyaa waqtigooda. Dheefaha luminta mushaharka waxaa lagu bixiyaa si lamid ah muddada mushaharka shaqada caadiga ah.

- Haddii caymisku diido sheegashadaada dheefaha luminta mushahar oo aad naafo ahayd in ka badan saddex maalmood oo kalendar: Caymiyuhu wuxuu kuu soo diri doonaa ogeysiis 14 maalmood gudahood. Ogeysiisku waa inuu si cad u sharaxaa xaqiiqooyinka iyo sababaha ay u aaminsan yihiin in dhaawacaaga ama xannuunkaagu aanay ka soo bixin shaqadaada ama sababta dheefaha luminta mushaharka ee la sheeganayo aanay la xiriirin dhaawacaaga.

  Haddii aanad ku raacsaneyn diidmada, la hadal hawlwadeenka sheegashada caymiska ee maareynaya sheegashadaada. Haddii aanad ku qanacsanayn oo aanad weli ku raacsanayn diidmada, ka wac Miiska Caawinta Department of Labor and Industry's Workers' Compensation lambarka 651-284-5005 ama 800-342-5354.

Khiyaano

Qaadashada dheefaha magdhawga shaqaalaha ee aanad xaq u lahayn waa xatooyo. Wac 888-372-8366 si aad uga warbixiso khiyaanada magdhawga shaqaalaha.

Magaca Caymiyaha iyo macluumaadka xiriirka

DEPARTMENT OF LABOR AND INDUSTRY

651-284-5032 • 800-342-5354 • dli.workcomp@state.mn.us • dli.mn.gov

Sharcigu wuxu waajibinayaa in xogtan lagu soo dhejiyo meel shaqaaluhu sii fiican uga arkaan.

Janaayo 2026